

# Sharciyada amaahda

Waxaan rajaynaynaa in kaarka amaahda ee rugta buugaagta/laybareeriga uu farxad wayn kuu keeno. Waxaad amaahan kartaa buugaag, filimo, musik, ciyaaraha- Tv, jaraaidka iyo waxyaabo kale oo badan oo ka amaahan kartid baska buugaagta iyo rugta buugaagta/laybareeriga ee Göteborg.

Waa bilaa lacag amaahdu, laakiin waxaa jira dhowr shuruudo ah oo u baahan inaad raacdid. Qoraalkan waxa ku qoran waxyaabaha ugu muhiimsan inaad ogaatid.

## Waa shay qiimo leh

Kaarka laybareeriga waa shay qiimo leh oo qofka u gaar ah. Hadii uu kaa lumo waa in isla markiiba la xiraa.

Kaarka waad xidhi kartaa habeenka iyo maalintaba, waxaad waci kartaa mashiin taleefan ka jawaabe, wac 031-368 34 34.

Adiga ayaa ka masuul ah wax kasta oo kaarkaaaga lagu amaahdo- xitaa hadii cid aan xaq u lahayn wax ku amaahato. Waalidka ayaa ka masuul ah kaarka caruurta iyo wixii lagu amaahdaba.

## Qoraalka shaqsiga

Qoraalka ku saabsan sidii laguula soo xidhiidhi lahaa waxa lagu xisaabiyaa qoraalka shaqsiga waxayna qoraalkaasi hoos yimaadaa qawaaniinta difaacda sharciga macluumaadka. Waad ogaan kartaa sida aan u xalino qoraalka shaqsiga oo ka akhrisan kartaa boga internetka [www.goteborg.se/personuppgifterbibliotek](http://www.goteborg.se/personuppgifterbibliotek)

Adiga ayaa ka masuul ah si macluumaadka sida laguula soo xidhiidhi lahaa hadii ay wax iska bedelaan.

## Inta la amaahan karo

Inta la amaahan karo caadiyan waa sadex usbuuc waxaana lagu siinayaa rasiidh ku qoran tahay xiliga aad amaahda soo cilinaysid. Adiga ayaa ka masuul ah amaahda ilaa inta aad kasoo celinaysid.

Boga internetka ee [gotlib.goteborg.se](http://gotlib.goteborg.se) waxaad ka helaysaa wax kasta oo la amaahan karo, mar kalena amaahda waad korodhsan kartaa, wixii aad rabto ee markaas oolin kiyuu baad u geli kartaa, wakhtigaaga amaahdana waad arki kartaa. Waxyaabahaas oo dhan waxaad kaloo ka heli kartaa app:ka Biblioteket. Laybareerigu kama masuul aha wixii dhaawac ah ee soo gaadha wixii teknik ah ee media aad amaahatay.

## Xasuuusin

Adeega dheeraadka ah ayaad dooran kartaa si laguugu soo diro e-post. Markaa waxaa lagu soo dirayaa xasuu laba cesho ka hor iyo maalin ka dib xiligii lagaa rabay inaad amaahda soo celisid. Boosta caadiga ahna warqad ayaa laguugu soo dirayaa ah inaad amaahdii la daahday oo laba usbuuc wakhtigiisii dhaafay.

## Kombiyuutarada

Laybareeriga waxa yaala kombiyuutaro bilaash lagu isticmaali karo. Laguuma ogola inaad ka baartid ama ku baahisid kombiyuutarka waxyaabaha loo yaqaan pornografi, ama cunsurinimada ama wixii kale ee mamnuuc ah. Ma isticmaali kartid cid kale nambarkooda qarsoon ama aqoonsi cid kale.

Ilaali qalabka teknikada ee meesha yaala, hadii wax jabaan/kharibmaan u sheeg shaqaalaha oo ixtiraan dadka agagaarkaaga jooga.

## Kharashka

Kaarkaaga maktabada ee ugu horeeya waa lacag la'aan, hadii markaas kadib kaar cusub u baahato waxaan kaa qaadi doonaa kharash. Waxaa kaloo kharash lagaaga qaadayaa alaabta aad deysatey hadii ay kaa lumaan ama ay halaabaan, kharashka kama danbeyta ah waxay ku xiran tahay shayga aad deysatey. Waxaad xogtii ugu danbeysey ee kharashka ka heley-saabogaan: [goteborg.se/bibliotek](http://goteborg.se/bibliotek). Biilasha aadan bixin waxaa loo gudbinayaa shirkado lacag dheeri ah oo ganaax ah kugu daraya tii hore ee lagu lahaa.

Biblioteken i  
Göteborg